Jamhuuriyadda Somaliland
Dawladda Hoose ee Hargeysa

Sharciga Lahaanshaha Dhulka
(Shahaadadda Dhulka Banaan)

| Macluumaadka Dhulka | |
|---|---|
| Lambarka Faylka (TR) | 22333 |
| Taariikhada Diiwaangalinta | 22-01-2022 |
| Lambarka Shahaadadda | 708495166-22378 |
| Cabbirka Dhulka | 24*90 M |
| **Cinwaanka Dhulka** | |
| Lambarka Albaabka | 1 |
| Magaca Wadada | Lane 30,69th Avenue |
| Xaafada | Masalaha |
| Degmada | Ahmed Dhagah |
| Lambarka Boosta | 90305 |
| **Magaca Mulkiilaha/Mulkiilayaasha** | |
| MAXAMED MAXAMUUD AXMED [P] | |

Sharciga Lahaanshaha dhulka waxa shuruud u ah, macluumaadka ku xusan shahaadadan xaggeeda dambe. Dawladda Hoose ee Hargeysa waxay caddaynaysaa in xogta kor ku xusani ay tahay mid waafaqsan macluumaadka ku kaydsan diiwaankeeda dhulka.

Xog-Hayaha Fulinta

Ku-Xigeenka Duqa Caasimadda

Duqa Caasimadda

JAMHUURIYADA SOMALILAND
DAWLADA HOOSE HARGEYSA

REPUBLIC OF SOMALILAND
HARGEISA MUNICIPALITY

XAFIISKA XOGAHAYAHA

Go'aan Lr: 329/2024

Date: 25th November 2024

Go'aan Guddi Fulneed:

Shir ay isugu yimaadeen Guddida Fulinta Caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 25 November 2024 shir Gudoomiyena ka ahaa Duqa Caasimadda JSL (MD C/kariim Axmed Mooge), Kuna saabsanayd Cancell'gareen fayl (Tirtirid), Dood iyo falan qayn dheer ka dib.

Wuxuu Go'aansaday:-

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay:- | Sharciga Wasaaradda Arrimaha Gudaha Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL. |
| Markuu Arkay:- | Warqada ku suntan MGH/DDL/AMH/975/2024 ee 09/10/2024 ujeedadeeduna tahay Fadhi Furan, Kana soo baxday Garsoorka Maxkamadda Gobolka M/Jeex (C/raxmaan Maxamd Cilmi). |
| Markuu Ogaaday:- | In muwaadinka magaciisu yahay Maxamed Maxamuud Axmed oo leh faylka Tr'kiisu yahay No:22333in maxkamadu soo saartay in la baabiiyo la Cancel'gareeyo). |
| Markuu Xaqiiqsaday:- | Inay lagama maarman tahay in la Cancell gareeyo faylkan TR kor ku xusan yahay cabirkiisu yahay 90X24M kuna yaala Degmadda A/dhagax Xafadda Masalaha maadaama ay soo cadaysay maxkamadu in la cancel-gareeyo. |
| Markuu Tixgaliyay:- | Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso |

Gudiga Fulintu:-

Kadib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan Guddida Fulintu wuxuu go'aansaday in la Cancell'gareeyo (Tirtiro) faylka TR'kiisu yahay 22333,kuna qoran yahay Maxamed Maxamuud Axmed, lana sii daayo faylka Tr'kiisu yahay 47214 Cabirkiisuna yahay 90X24M,Kuna qoran tahay (Safiya Maxamuud Maxamed),Maadaama ay maxkamadu soo cadaysay inuu yahay fayl qaldan, Haddaba faylkaasi kor ku xusan waa in sharciga loo raaco lana cancel'gareeyo,Faylka cusubna la sii daayo.

(Siciid Nuur Aw Jaamac)
Xoghayaha Fulinta D/hoose Harg ahna
Xoghayaha Golaha Degaanka Hargeysa.

(Khadar Axmed Cumar(Khadar Nuur)
Ku Xigeenka Duqa Caasimada ahna
Gud/Xigeenka Golaha Deegaan Harg

(C/kariin Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargaysa ahna
Gud.Golaha Deegaanka Hargaysa

faraha uga qaado dhibanta, waxa ka maqana uu walaalkii u donayaano.

Markay Aragtay: Qodobada sharci ee kala ah: 103, 114, 110, 114, 116, 119, 120, 121, 123, 163, 172, 184, XHC. Iyo Qodobka 375.378,489 XCG, waxay Maxkamaddu soo saartay xukunkan.

## Jamhuuriyada Somaliland
## Magaca Ummada Somaliland
## Maxkamadda Gobolka M/Jeex
## Xukunka Maxkamadda

1) Maxkamada gobolka maroodi jeex hargeysa waxay danbiile u aqoonsatay danbiilaha Magaciisu yahay
   - Maxamed Maxamud Axmed Ina Faadumo Jaamac 70 jir ah.
2) Maxkamadu waxay ku xukuntay Danbiilaha Xadhig Ciqaabeed dhan Lix (6) Bilood oo ay kaga xukuntay Qodobka.375 XCG iyo Lix (6) Lix Bilood oo ay kaga xukuntay Qodobka 378/370 XCG, isugayna Noqonaysa Hal(1) sano oo xadhig Ciqaabeed ah iyo 1,000,000/= (Hal Milyan SL Shilin), oo ay kaga xukuntay Qodobka 489 XCG.
3) Sidoo kale waxa ay maxkamadu ku xukuntay danbiilaha xuquuqdii madani ee dhibanta oo ah Dhulka shanta (5) Baloodh ee uu Eedaysanuhu ka haystay.
4) Maxkamaddu waxay baabiisay Faylka leh Tr No.22333 ee uu ku qoran yahay Eedaysanaha Magaciisu yahay: Maxamed Maxamud Axmed. Sidoo kale waxay Maxkamaddu Sugtay lahaanshaha sharci Nimada Faylka Tr No.47214 oo ay leedahay kuna qoran tahay Dhibanta magaceedu yahay: Safiya Maxamud Muxumed kuna yaala degmada A/dhagax Xaafadda Masalaha Cabirkiisuna yahay 90mx24M, Jihooyinkiisuna kala yihiin: Galbeed: Dhisme, Bari:Waddo, Waqooyi:Waddo Iyo Koomfur:Waddo, oo ah Nus-Baloog.
5) Xadhiga Waxa looga soo bilaabayaa danbiilaha Maalintii lasoo xidhay oo ay taariikhdu ahayd 11/06/2024.
6) Xukunkan waxay maxkamadu u cuskatay Qodobada: 375.378,489 XCG.
7) Xukunkan waxa ka furan rafcaan mudada sharcigu ogol yahay oo ah 30 cisho gudahood.
8) Xukunkan waxa lagu dhawaaqay manta oo ay taariikhdu tahay **09/10/2024.**

C/raxmaan Maxamed Cilmi ______
(Garsooraha Maxkamada Gobolka M/Jeex )

Kaaliye: Maxamed Ismaacil Ibraahim